



MINNEAPOLIS  
PUBLIC SCHOOLS  
Urban Education. Global Citizens.

## Minneapolis Public Schools Health Related Services



### Injirta Madaxa (Head Lice)

Gacaliye Waalid/Daryeele:

Injirta madaxa gasha ayaa lagu arkay fasalka cunugaaga. Qof kasta ayaa injirtu gali kartaa. Ma sababaan jirro ama bugto. Shayga ugu muhiimsan ayaa ah in markiiba la daweeyo. Faldan ilmahaaga ka hubi injirta madaxa gasha. Warqaddan ayaa kuu sheegaysa macluumaad muhiim ah ee la xiriira injirta madaxa.

**Sababta:** Waa cayayaan yar yare e loo yaqaanno injir.

**Astaamaha:** Madaxa oo ku cun cuna. Jiritaanka injirta ama qandhicilka (nits) ama ugaxda injirta ayaa yar yar oo ah kuwo leh midab casuuro bunnii xiga leh ukumihisuna yihiin qaabka beedka (ukunta) kuwaasoo ku dhega timaha, lehna toxob ka dhacda timaha. Injirta ayaa yar midabkeeduna yahay cayayaan bunnii ah taasoo dhaqso ugu dhex socota timaha. Wayna adag tahay in la arko.

**Faafid:** waxay ku fidda haddii laba madax is-taabtaan iyo hadii la wadaaga shayada gaarka loo leehay ayna ka mid yihiin shanlada, koofiyadaha, go'yaasha, barkimaha iwm. Injirtu **MA** boodo, mana duusho, way gurguurataa, madaxana way ka dhici kartaa. Qandhicilka (Nits) u jira hiish barkiis dhakada ayaa mayd ah ama maran oo aan u dillaacayn injirnimo. Injirtu kuma fiddo kamana fiddo xoolaha rabbaayadda ah.

**Xilliga taranta:** Waxay ku qaadataa 7 ilaa 10 beri inta ay ukumaha ka dhigto ilaa inta ay ka dillaacayaan.

**Ka reebid:** Ardayda leh injirta madaxa ayaa dugsiga ku soo laaban kara kaddib mark injirta looga daaweeyo daawada injirta disha, isla markaasna aanay ka muuqan injir nool oo la arki karo.

**Daweynta:** Isticmaal qalabka dila injirta, si taxadar leh u raac tilmaamaha daawada ku qoran (gaar ahaan **Cadadka la isticmaalayo, mudada daawadu madaxa ku jirayso, ama hadii loo isticmaalayo madaxa oo qalalan ama qoyaan leh**). Wax soo saarrada qaarkood ayaa u baahan dawayn labaad 7 ilaa 10 beri kaddib, si loo dilo injir kasta oo dillaacday dawaynta hore kaddib. Dawaynta u isticmaal saxanka wajiga lagu dhaqdo, HANA isticmaalin meesha qubayska. Markastana dabool indhaha. Ku dhaq gogosha iyo dharka aad dhawaan isticmaashay biyo kulul, kuna qalaji qallajiye aad u kulul. Shanlooyinka iyo buraashyada ayaa lagu qoyn karaa biyo qandac ah (een kararayn) ilaa 10 daqiiqo, ama lagu nadiifin karaa caday duq ah iyo biyo saabuun leh. Iska ilaaliye daawada injirta ee buufiska ah. Inaad faakiyuumto ayaa ugu ammaansan, uguna fiican si aad injirta ama qandhicilka dhacay uga nadiifiso qalabka, roogagga, tooyada xoolaha caagga ka samaysan, boorsooyinka dhabarka iyo kuraasta gaariga. Beddel boorsada faakiyuumka kaddib marka wax ku nadiifiso. Qoyska oo idil ka hubi injirta madaxa. **KELIYA** dawee kuwooda injirta leh. Inkastoo ay adag tahay in la sameeyo, **ka saar qandhicilka oo dhan, adigoo isticmaalaya shanlo bir ah ee qandhulka**, ama ciddiyahaaga, si aad qandhicilka uga siibto timaha. Si wad inaad hubiso madaxa, shanlaysana maalin kasta intii 2 asbuuc ah.

**Xusuusnow:** Injirtu ma doorato meesha ay ku degayso ama galayso. Haddii aad aragto in cunugaagu/caruurtaadu injir leeyihiin, faldan ku wargali xafiiska kalkaalayaha dugsiga.